

## Sida loo isticmaalo saliingada horey loo soo buuxiyey ee innohep®

Macluumaadka bukaanka ee dadka loo qoray dawada innohep®. Akhri warqada baqshada si taxadir leh kahor inta aanad daawaynta bilaabin. U fariiso, u seexo, ama u istaag boos aad ka arki kartid maqaarka aad rabtid inaad durtid. Nooca irbada ee lagu siin doono waxaa loo yaqaan irbada maqaarka laga hoos mariyo. Irbadu waxay gashaa qaybta baruurta ee ka hooseysa maqaar sida uu sheegey dhakhtarka ama kaaliyaha caafimaadku. Ka ilaali meesha hoose ee calooshaada, ama meel goordhow la durey. HA durin muruqa xiddidaha dhiiga. Waa inaad hal wakhti maalin kasta durtaa. Dhaq gacmahaaga ka hor intaadan durin cirbada.



1. Dooro aag la duro. Unuga baruurta ah ee xundhurta hoose ugu yaraan 5 cm ka fog qeybta caloosha kuusan ayaa ah aag caadi u ah durida. Ku nadiifi goobta duridda aalkosha oo engeji. Haddii calooshu aanay ku habboonayn in la duro, ka eeg meelo kale oo la duri karo hoos.



2. Ka saar saliingada tuubada adigoo si buuxda u qaloocinaya gadaal daboolka midabka leh ee ku jira tuubada. Eeg saliingada si aad u xaqiijiso in aanu lahayn ceeryo ama aanu ku jirin wax haraa ah Haddii ay sidaa tahay, dooro siliinge kale.



3. Hoos uga qalooci aalada badqabka oranjiga si ka fog daboolka cawlan ee cirbada. Ka saar daboolka difaaca cirbada adigoo si toos ah u wareejinaya oona u jiidaya, iyadoon la qaloocineyn cirbada. Ka fagoow taabashada cirbadda aan nadiifka ahayn.



4. Saliingada waxaa ku jiro baabalka hawada oo ay tahay inaan laga saarin kahor durida. Ku hagaaji xadiga saliingaha ku jira sida lamuhraanka ah ee qiyaasta uu dhakhtarkaagu kuu qoray. Wixii ka badan xadiga waa in laga saaraa iyada oo la tuujinayo buufinta saliingada iyada oo kor loo jeedinayo. U isticmaal qaabka saliingada ee tilmaamaha ah.



5. Kor u qaad duubka maqaarka inta u dhaxaysa suulka iyo farta. Wada geli irbada gebi ahaanba, si wada socda maqaarka oo ku mud dawada aayar baruurta maqaarka hoostiisa. U soo jiid irbadda kala bar oo firi ilaa 10. Kadibna soo bixi cirbadda ilaa banaanka oo dhan.



6. Adigoo isticmaalaya sagxad adag, qalooci aalada badqabka oranjiga ah sifo ey haddeer u wajahdo isla jihada cirbada (kusoo celi booskeedi hore). Dabadeedna iyadoo aalada badqabka simman ku aadan sagxad adag sida miis, si tartiib ah hoos u riix ilaa ay cirbada kaga dhegto aalada.



7. Geli saliingada la isticmaaley baaldiga balaastiiga ah. Hoos u riix daboolka tuubada ilaa aad ka maqashid iney meel qabsatay. Saliingada iminka waa mid amaan ah waana la tuuri karaa. Saliingada la isticmaalay, ee Meesha lagu xidhay waxaa lagu soo celin karaa isbitaalka ama farmasiga.



8. Fadlan dooro goob kale oo aad iska durto marka xiga. Isku bedel dhanka midig iyo bidix.



9. Aagaga durista ee lisku beddelaayo ayaa ah, qeybaha bannaanka ee bowdadada, dhabarka qeybta sare ee gacanta. Farsamada waxay la mid tahay sida durista xundhurta.



10. Haddii aad qabtid wax su'aalo ama dhibaatooyin ah, lasoo xiriiir dhaqtarkaaga ama kalkaalisadaada.



11. Waxaad sidoo kale daawan kartaa fiidiyawga filmamaaha ee hoose ee sida aad u maarey-nayso oo aad iskugu dureyso innohep®. Aad [www.medicinstruktioner.se](http://www.medicinstruktioner.se) or [www.fass.se](http://www.fass.se) oo raadi innohep®, ama iskaan garee QR koodhka mobile-kaaga ama taableet-kaaga. Waxaa jira qoraalo aad ku heli kartid dhawr luuqadood.

